

Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraanaysa ee DPS

Kulanka 6aad / Caqabadaha Diiwaangelinta Yaraanaysa, 4tii Meey, 2022

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Soo-dhaweyn & Isxaadirin	<p>Kulamadu waxay ku bilowdaan 4ta galabnimo soo-dhaweyn iyo isxaadirin. Luuqadaha loo keenay turjubaanka ayaa la sheegay. Ka dib xasuusinta guud ee heshiisyada kooxda iyo dibu-eegista ajandaha, kooxdu waxay si toos ah u bilaabeen dibu-eegista shuruudaha ay diyaariyeen dadka noo tabarruca. Guddigu waxa ay dhagesteen habka guud ee xiriiriyaha DPS oo waxaa la xasuusiyay in ay shuruuduhu ku saabsan yihiin aqoonsiga iyo doorashada iskuullada la isku darayo ama la xirayo. Qaar ka mid ah faallooyinkii iyo ama walaacyada waxay ku saabsanaayeen hirgelinta waxa lagu go'aamin doono taariikhda dambe. Qorsheyaasha iskaa wax u qabso ah ee koox kasta oo isku xiriiran oo ay ku jiraan jaatarrada, waalidka & bulshada, maamuleyaasha & hoggaamiyeyaasha iskuullada, iyo macallimiinta, ka dibna waxay wadaageen shuruudaha ay sameeyeen. Kooxdu waxay soo saartay saddex shuruudood oo aasaasi ah oo ay la socdaan shuruudo-hoosaadyo, kuwa aan laga gorgortami karin, iyo qeexidda ereyada la isku soo gaabiyey ee la isticmaalo. Shuruudaha ayaa loo bandhigay kooxda, oo xubnaha guddigu ayaa ka bixiyey faallo iyo talooyin wax looga beddelay waraaqda lagu shaqeynayo. Waxyaabihii xigay waxaa ka mid ah hagaajinta joogtada ah ee qoraalka iyo uruurinta jawaabaha bulshada oo dhan. ***GUDDIGA WUXUU GO'AAMIYEH INAY SII WADAAN QORISTA KA HOR INTAAN DADWEYNAHA LOO GUDBIN, oo waxaa la weydiiyey in ay intarnetka soo gejiyaan su'aalo gaar ah oo ku saabsan shuruudaha jawaabaha dadweynaha</p>
Fikradaha Dadweynaha	<p>Hadda kooxdu waxay hayaan qoraalka shuruudaha oo waxay rabaan in la helo talada dadweynaha. Waxaa ka mid ah jaatarrada, qoysaska, bulshada guud, iwm. Hadafku waa in la hubiyo in habraacu yahay mid loo siman yahay oo si guud loogu isticmaalo iskuullada iyada oo aan loo eegin xaaladdooda. Sidoo kale, waa in la hubiyo in wixii go'aamo ah dadka ay khuseyso loola socodsiiyo sida ugu habboon.</p>

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
<p>Sharciyada iyo Shuruudaha Qoraalka</p>	<p>Qoreyaasha ah tabbarruceyaasha ee ka socda kooxaha xiriirka ayaa kulmay ka hor kulanka 6aad, oo waxay keeneen qoraal ka kooban saddex shuruudood si loogu isticmaalo xirista ama isku-darista iskuullada. Shuruuduhu weli waa qabyo oo waxaa diiradda lagu saarayaa saddex qaybood oo waaweyn:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Aqoonsiga iskuullada diiwaangelintoodu yaraaneyso, gaar ahaan marka loo eego tirada ardeyda iyo miisaaniyadda. ● Aqoonsiga iskuullo badan oo ardeydu ku yar tahay isku deegaan/xaafad. Miyey wax saadaal ah muujinayaan yaraanta diiwaangelinta oo joogto ah? ● Aqoonsiga iskuullada waa in loo eego xasilloonida dhaqaalaha. Miyey iskuulladu awoodaan in ay dhaqaalahooda xal u helaan? <p>Kooxdu waxay wadaageen qaar ka mid ah welwelkooda ku saabsan shuruudaha, oo waxay u sii baxeen kooxo yaryar si ay u hagaajiyaan oo ay u soo jeediyaan talooyin ku saabsan shuruudaha. Xubnaha guddiga waxaa markaas loo oggolaaday in ay soo gudbiyaan jawaabaha guud iyo in la dhegaysto cabashooyinka guddiga intooda kale. Hadaafku wuxuu ahaa in la diyaariyo qoraal kama-dambeys ah oo si guud loo wadaagi karo si ay dadku uga jawaabaan. Qoraalka bilowga ah ma aha kii ugu dambeeyey ee waxa uu sii mari doonaa in lagu noqnoqdo marar kale, oo guddiga ayaa wax ku kordhinaya, ka hor intaan loo bandhigin kormeeraha iyo guddoonka waxbarashada.</p>
<p>Muhiimadda & Walaaca</p>	<p>Guddidu waxay muujiyeen walaacyo dhowr ah oo ku saabsan shuruudaha ay ay soo qoreen dadkii ahaa tabarruceyaasha. Qaar ka mid ah xubnaha ayaa xusay in laga yaabo in ay jiri karaan shuruudo dheeraad ah oo ku jira shuruudaha hoose. Sidoo kale qaar ka mid ah fikradaha ayaa laga yaabaa in aan si buuxda loogu dhex muujin qoraalka. Walaaca kale ee ku saabsan shuruudaha waxaa ka mid ahaa balse aysan ku ekeyn waa:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Miyey shuruuduhu xaddidi doonaan madaxbannaanida iskuulka? ● Miyaan beddeli karnaa hadalka lacag-ururinta iyo sida ay iskuulladu u wada shaqeyn karaan intii ay u tartami lahaayeen deeqaha? ● Miyaan ku dari karnaa shuruudaha tirada ardeyda aan eber ahayn intii uu kormeeraha guud go'aamin lahaa waxa dhici doona?. ● Miyaan xisaabineynaa galaasyada ECE marka la isku daro iskuullada? ● Maxaa dhacaya haddii ay qoysasku qiimeeyaan iskuullada yaryar intii ay qiimeyn lahaayeen kuwa waaweyn? ● Maxaa ka soo bixi kara marka ay iskuulladu wada shaqeeyaan? ● DPS had iyo jeer ma raaci doontaa qorshaha gaadiidka ee guddoonka
<p>Tallaabooyinka Xiga</p>	<ul style="list-style-type: none"> ● Sii-wadid ah hagaajinta qoraalka shuruudaha ● Codsiga jawaabaha bulshada oo dhan oo ah in la daraasadeeyo ● Wada-hadal ah wixii tabasho ah ee ka yimaada bulshada ama kooxda